

Sideed u xasuuusnaan doontaa 2020?

Ma xasuuusnaan doontaa Caabuqa COVID-19-ban iyo sida ay u saamaysay nolol maalmeedkaaga caadiga ah? Ma xusuusnaan doontaa inaadan aadin booskaagii qjirada badnaa ee aad ugu jeclayd ama aad ka qeybgasho ciyaar ka dhacda Gobolka Ohio ee Buckeyes? Ama, si kafiican, ma xusuusnaan doontaa inaad ka qayb-qaadatay geeddi-socodkii siyaasadeed ee dimuqraadiyadda oo aad codaysay Doorashadii Madaxweynaha ee 2020?

Haddii aad tahay muwaadin reer Ohio ah oo aad jirto 18 sano ama kabadan oo aad deggan tahay Ohio ugu yaraan 30 maalmood, waa waajibaad-kaaga dastuuriga ah inaad is-diiwaangeliso oo aad ku muujiso xaqqaaga iyo masuuliyadaada ah inaad cod-bixiso oo aad u codeyso inaad doorato musharrixiinta ku metelaya. Sannadkan, waxaan haysanna fursad muhiim ah oo aan ugu codeyn karno mas'uulka ugu sarreeya qarankeenna ee la soo doorto, Madaxweynaha Mareykanka.

Waa in lagu diiwaangeliyo si aad u-codeyso ugu dambeyn Sabtida, 3-da Oktoobar si aad ugaqeyb-gasho Doorashada Madaxweynaha 2020 waana muhiim inaad hada talaabo qaado.

Ka bilow maanta adoo booqanaya bogga Xoghayaha Gobolka Ohio ee www.Ohiosos.gov. Halkaan waxaad ka heli kartaa jawaabaha su'aalahaaga oo aad ku xaqijin karto inaad tahay cod bixiye firfircoон oo diiwaangashan, isdiiliwaangeli si aad u codeyso, cusbooneysiiso diiwaangelintaada cod-bixiyaha, codso Codsiga Cod-bixinta Maqanaha, hel bogga codbixintaada, akhri wararka laxiriira doorashooyinka, codso inaad noqoto shaqaale goobaha codbixinta, waxbadanna ka baro sida Ohio uguhogaamiso nabadgelyada doorashada.

Ohio waxay leedahay seddex qaab oo loo codeeyo

- Ka soo codee Codeynta Maqanaha (Absentee Ballot) hadaad kuqanacsantahay gurigaaga, haddii aadan awoodin ama aadan rabin inaad qof-ahaan (toos) u codeyso. Buuxi waraaqda Cod-bixinta oo ku soo dir boostada adiga oo ku diraya boostada ku habboon. Si kastaba ha ahaatee, iyada oo la tixgelinayo suurtagalmimada kororka balaaran ee cod-bixinta ee waraaqaha cod-bixinta ee lasoo gudbinayo sannadkan cudurka faafa awgiis, Adeegga Boostada Mareykanka ayaa laga yaabaa inuu ka bato. Beddelka ayaa ah inaad u dhiibto Cod-bixiyahaaga Maqanaha Sanduuqa rasmiga ah ee Ballot-ka ee xafiiska Guddiga Doorashada ee deegaankaaga.
- Codee waqtii hore iyo qof ahaan, laga bilaabo 6-da Oktoobar xafiiska Guddiga Doorashada ee deegaankaaga si looga fogaado inay dhacaan safaf dhaadheer oo suuragal ah maalinta doorashada
- Qof ahaan (toos) uga codee Goobaha Cod-bixiyaha ee laguu qoondeeyay 3da Noofeembar

Haddii aad codeyso adoo maqan, goor hore iyo qof ahaan ama goobaha codbixinta, hubi in codkaaga la maqlay oo la tirihey codkaaga.

Marka laga hadlayo tirinta, 2020 sidoo kale waxaa lagu xasuuusnaan doonaa sanadkii Tirakoobka.

Dastuurka Mareykanka wuxuu farayaa in Dowladda Federaalka ay sameyso Tirakoob 10kii sanaba mar, si loo helo tiro koob iyo sahan sax ah oo lagu sameyso dhammaan dadka ku nool Mareykanka.

Tirakoobka ayaa muhiim u ah Ohio! Natijjooyinka waxay go'aaminayaan inta kursi ee ay Ohio ka hesho Aqalka Wakiilada Mareykanka iyo Golaha Guud ee Ohio. Waxay go'aamisaa maalgelinta federaalka ee muhiimka ah ee ay Ohio ka hesho xagga waxbarashada, gaadiidka, caafimaadka, guryeynta iyo barnaamijyada kale ee qoysasku ku tiirsan yihiin bulshadaada iyo Ohio oo dhan. Waa muhiim inaad buuxiso Tirakoobkaaga ka hor 30-ka Sebteembar ee booqo www.census.gov. Adeegso xuquuqdaada codbixinta oo maanta buuxi Tirakoobkaaga si aad u xasuuusato sannadka 2020 oo ah sanadkii aad qaadday talaabadii lagugu tirihey. Mahadsanid.